



Su'aalaha Muhiimka ah: Qodobada macluumaadka ee ku saabsan wadaaga qarashka ee diiwaangelinta Family Care ama IRIS (Include, Respect, I Self-Direct)

Waa maxay wadaaga qarashka?

Dadka qaarkiisa ee ka diiwaangashan barnaamijyada Medicaid sida Family Care (Daryeelka Qoyska) iyo IRIS (Waxaa ka mid ah, Xushmad, Toosinta Nafteda) waa inay bixiyaan qeybta qarashaadka adeegyada. Tan waxaa loo yaqaan wadaaga qarashka.

Goorma ayaa la bixiyaa wadaaga qaarshka?

Haddii aad leedahay wadaaga qarashka, waxaad bixineysaa wadaaga qarashka bil-laha buuxo ee la bilaabanayo bisha ee aad iska diiwaangelisay Family Care ama IRIS.

Waa sidee tirada wadaaga qarashka la xisaabiyay?

Tirada wadaaga qarashkaaga wuxuu ku saleysanyahay dhowr xaqiiqo oo ay ku jiraan daqligaaga guud, heerka gurka, diyaarinta noolaanshaha iyo deymaha kale ee caafimaadka la ogolaan karo. Xafiska Dayactirka Daqliga (Income Maintenance) ayaa go'aansanayo tirada wadaaga qarashkaaga. Aging and Disability Resource Center ayaa tilmaamayo tirada la qiyaasay ee wadaaga qarashkaaga ka hor diiwaangelintaada.

Miyay saameysaa halka aan ku noolahay xisaabinta?

Haa, dadka ku nool Xarunta Deegaanka Ku saleysan Bulshada (Community Based Residential Facility), Guriga Qoyska Dadka weyn (Adult Family Home) ama Dhismaha Dabaqa Daryeelka Daganaanshaha (Residential Care Apartment Complex), waxay isticmaali kartaa qaar ka mid ah qarashaadkooda/qarashaadka lagu yareynayo tirada wadaaga qarashkooda.

Shaqsigaadka ku nool guryahooda, haddii ay leeyihiin ama u kireysantahay waxay sidoo kale helayaan qarashaadka noolaanshaha ee xaqiiqdaas ee tirada wadaaga qaarshka. Qarashaadkaan waxaa ku jiro kirada ama amaahda guriga, caymiska kirada ama milkiilayaasha guriga, canshuurta dhismaha iyo qarashaadka korontada ee kuleelka, biyaha, siiwajka iyo korontada.

Shaqsigaadka hadeer ku jira xarunta caafimaadka, oo leh guri ama dabaq waxay heli karaan deynta qarashka lagu joogteynayo guriga haddii dhaqtarkooda cadeeyo inay u dhowyihiin inay ugu laabtaan guriga lix bilood gudaheed iyo xaaskooda kuma noola guriga.

Waa maxay gunada baahiyada shaqsiga?

Qof walba waxaa loo ogolyahay inuu ku haysto daqliga qaar isticmaalka shaqsiga. Tani waxaa loo yaqaan gunada baahiyada shaqsiga. Aging and Disability Resource Center waxay kugu caawin kartaa barashada tirada gunadaada baahiyada shaqsiga ah.



Yaa helaa lacag bixinta wadaagida qarashka?

Dadka ka diiwaangashan Family Care waxay ugu soo diraan lacag bixinada qarashka la wadaago si toos ah ururka daryeelka la maareeyo (MCO, managed care organization) ee inay ka diiwaangashanyihiin. Dadka ka diiwaangashan IRIS, u soo dir wadaaga qarashka wakiilkooda badrooniga maaliyada IRIS (FEA, fiscal employer agent).

Maxaa ku dhaco wadaaga qarashka markii qofka badelo barnaamijyada ama MCO, ama hay'ada la taliyaha IRIS inta lagu jiro isla bisha?

Dadka waxay dooran karaan inay badelaan barnaamijyada ama laga saaray diiwaanka daryeelka la maamulay ama barnaamijka IRIS ee waqti walba. Haddii qofka ku sameeyaa lacag bixinta qarashka la wadaagay barnaamijkooda hadeer oo kadib doortaa inuu ku badesho barnaamij ka duwan ama MCO cusub ama hay'ada la talinta IRIS inta lagu jiro bishaas, ma jiraan lacag bixin dheeraad ah ee loo baahanyahay. Wadaagida qarashka waxaa la aruurin karaa kaliya haljeer bishiiba.

